

QORAAL – Farriinta Agaasimaha DD: Codsiga Mashruuca Qorshe Dejinta Kooxaha Kala Duwan La kordhiyay



Ogow: Codsigan loogu talagalay fursadan maalgelineed iyo sharxaadda mashruuca waana lagu turjumay oo laga helayaa:
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/compass-project.aspx>

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :
<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Sibtambar 3, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Codsiga Mashruuca Qorshe Dejinta Kooxaha Kala Duwan La kordhiyay

Miyaad daneynaysaa wanaajinta taageerada maamulka kiiska ee ka jirta Oregon? Haddii ay sidaas tahay, fadlan tixgeli in aad martigeliso Mashruuca Qorshe Dejinta kooxaha kala duwan adiga oo codsanaya \$2,000 si aad u maalgeliso dadaaladaada. Waanu kordhinay wakhtiga kama dambaysta ah ee loo qabtay hay'adaada/kooxdaada si ay u codsadaan taasi oo laga dhigay Sibtambar 20, 2021.

Bishii Abriil, waxaan bixiyay [macluumaad cusub](#) oo ku saabsan Mashruuca Qorshe Dejinta, oo ah dadaaladayada lagu wanaajinayo maamulka kiiska ee ka jira Oregon. Tallaabada xigta ee nidaamkani waa iskaashi la yeelanayo doontaa ururada bulshada iyo kooxaha wax u dooda si loo dhiirigeliyo kooxaha kala duwan 'focus groups' ee dadka u dooda naftooda iyo xubnaha ka tirsan qoyska si loo soo ururiyo jawaab celin ku saabsan talooyinka Qorshe Dejinta.

Waa muhiim in aanu si toos ah wax uga maqalno dadka ka tirsan adeegyada iyo xubnaha ka tirsan qoysaskooda. Waxa aanu ka barano kulamadani waxaa loo isticmaali doonaa in lagula shaqeeyo Qorshe Dejinta kooxda daneeyayaasha ah si loo dhammeystiro talooyinka.

Waxaanu rabnaa in aanu gaarno dadka aynaan inta badan wax ka maqal oo xaqiijino in dhammaan codadka oo dhani ay yeeshaan fursad lagu dhageysto. Haddii aad tahay qof, koox, shuraako, ama urur xiriir adag la leh bulshada naafanimada korriinka iyo dadka mudnaanta dheeraadka ah la siinayo (tusaale, Oregon Tribal Nations, Latino/x community, Black/African American community, LGBTQIA+ community, dadka midabyada kala duwan leh, dadka reer Oregon ee reer miyiga ah), fadlan tixgeli in aad codsato.

Waxaan ka codsanaynaa dadka helaya deeqda in ay martigeliyaan oo fududeeyaan kooxda kala duwan oo dhanka internet-ka ah 'focus group' oo loogu talagalay 5-20 oo ah dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo/ama xubnaha ka tirsan qoysaskooda. Faahfaahinta nidaamka iyo maalgelintu waxay ku jiraan sharaxaadda mashruuca iyo [internet-ka](#). Haddii aad daneynayso hay'adaadu/kooxdaadu waa in ay gudbiyaan codsiga ku lifaaqan, muddo aan ka dambeyn Sibtambar 20, 2021.

Fadlan hadalka u sii gudbi koox kasta ama ururada bulshada ee dhici karto in ay daneynayaan fursadan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.